

CANSHUURTA GAADIIDKA SI LOO DHAQAAJIYO SEATTLE



WARQADDA XAQIIQADA JUUNYO 2015

SOMALI

Wararkii hore

Jidadka Seattle, dhinacyada lagu socdo, iyo buundooyinka waxay dhaqaaajiyaan kumanaan dad maalin kasta. Intaas kaddib, waxay taageeraan xamuulka, hubinta in xamuulka la geeyo gudaha iyo agagaarka magaalada si loo buuxiyo qaanadaha dukaamaada buuxaan iyo si baakooyinka laguugu keeno albaabkaada hore.

Sideedii sanno iyo bar ee la soo dhaafay, canshuurta gaadiidka Bridging the Gap waxay kaalmo ka geysatay horumarinta ammaanka jidka, maalgelinta waddooyinka dadweynaha, iyo fullinta dayactirka waaweyn. Canshuurta iminka jirta waxay dhici doontaa dhamaadka 2015.

Bishii Maarso 2015, Duqa Magaalada Murray wuxuu ku dhawaaqay soona jeediyay talo draafti ah oo lagu baddalo canshuurta - Canshuurta Gaadiidka si loo Dhaqaaajiyo Seattle - taasoo ujeedadeeda tahay in wax laga qabto aasaaska, iyadoo isla markaas mustaqbalka maalgelisa hagaajinta lagu dhaqaaajiyo dad badan iyo xamuul gudaha iyo agagaarka magaalada sii koreysa ee Seattle.

Bilahii Maarso iyo Abriil, Duqa Magaalada iyo SDOT waxay xariir la sameeyeen bulshadaha Seattle si fikrado loogu biiriyo draaftiga la soo jeediyay. Jawaab laga bixiyay fikradaha bulshada, waxaan baddalnay talada la soo jeediyay ka hor inta aan loo gudbinin Guddiga Magaalada Seattle bishii Maajo. Inta ay socotay hawsha sharci dajinta, Guddiga Magaalada wuxuu baddalay talada la soo jeediyay, kaddibna bishii Juunyo 29, wuxuu u codeyay in canshuurta lagu darro cod bixinta Nofeembar 2015.

Kharashka

Canshuurta \$930 malyan waxaa laga bixin doonaa canshuurta hantida maguuraanka taasoo milkiilaha guriga dhexdhexaadka ah (\$450,000) ee ku yaal Seattle

ugu kici doonto ku dhawaad \$275 halkii sanno. Marka leys barbar dhigo, canshuurta iminka ku sugan in ay dhacdo ee Bridging the Gap waxay isla milkiilahaan guriga ugu kici doontaa ku dhawaad \$130 halkii sanno.



Lacagta \$930 malyan ee laga soo saaro canshuurta kaddib, Magaalada Seattle waxay qiyaastay in maaliyadaan loo adeegsan karo in lagu dhaliyo ku dhawaad \$2 balyan dheeraad oo ah maalgelinta gaadiidkka.


Warqadaan xaqiiqada waxaa ku jira liiska mashaariicda iyo barnaamijyada aan filayno in kharashkaas la bixiyo muddada sagaalka sanno ay jirto canshuurta, haddii la ogolaado. Sannad kasta, Guddiga Magaalada wuxuu ku-talogalka sannadka ka soo qaadi doonaa miisaaniyadda.

Kaddib marka aan adeegsanay habka Guddiga, waxaan dib uga shaqeynay afarta qeybaha canshuurta hore ee cusub una qeybinay saddax koox cusub:

1. Waddooyinka Ammaanka ah
2. Dayactirka iyo Hagaajinta
3. Fududeynta Saxmada

Bogagga soo socda waxay soo taxaan mashaariicda iyo xisaabta doolarka qeybahaan cusub.

QEYBTA	MAALGELINTA CANSHUURTA
 <p>Waddooyinka Ammaanka ah Samee waddooyin amman ah oo isku xera dugsiyada, xarumaha gaadiidka, iyo meelaha kale ee la tago</p>	\$207M
<p>Aragtida Eber (Vision Zero) - Fulli barnaamijka si loo soo af jaro shilalka culus iyo kuwa lagu dhinto</p>	\$71M
<ul style="list-style-type: none"> Jidadka Ammaanka: Dhamaystir 12 - 15 mashaariicda jidadka ammaanka, hagaajinta ammaanka dhamaan musaafiriinta isticmaasha jidadkena shilalka badan 	\$23M
<ul style="list-style-type: none"> Ammaanka Waddooyinka lagu tago Dugsiga: Dhamaystir Waddooyinka Ammaanka 9 – 12 ee lagu tago dugsiyada sannad kasta iyo aqoonta ammaanka, hagaajinta ammaanka socodka iyo baskiilka laga helo mid kasta oo ka mid ah dugsiyada dadweynaha Seattle. Dhamaystir mashaariicda saddaxda sanno hore gudahooda kaddib marka la qaado Canshuurta meelaha lagu socdo dugsiyada hoose, xaafadaha saboolnimada ku badan tahay: Bailey Gatzert, Martin Luther King, Jr., West Seattle, Dunlap, Dearborn Park, Wing Luke, Northgate, Van Asselt, Emerson, Concord, Rainier View, Roxhill 	\$7M
<ul style="list-style-type: none"> Calaamadaha iyo Sumadaha: Kordhi dib u rinjiyeynta meelaha laga gudbo jidka afar-sanno kasta ama wareeg ka fiican si loo hubiyo in gudub kasta si wanaagsan loo calaameeyo 	\$4M
<ul style="list-style-type: none"> Hawlaha Gaadiidka: Dayactir iyo hagaaji siistemka nalalka, calaamadaha, iyo sumadaaha baabuurta ee Magaalada 	\$37M
<p>Ammaanka Lugeeyaha iyo Baskiilka - badbaadi musaafiriintena tabarta darran - dadka lugeeya iyo kuwa raaca baskiilka</p>	\$110M
<ul style="list-style-type: none"> Ammaanka Baskiilka: Dhis ku dhawaad 50 mayl cusub jidadka la badbaadiyo ay baskiilada maraan iyo 60 mayl jidadka cagaaran, iyo in magaalada oo idil laga dhamaystiro in ka badan bar ka bar shabakada Qorshaha Sare Baskiilka (Bicycle Master Plan). Maaliyadda lagu tilmaamay qeybtaan, \$2 milyan waxaa loo dhigi doonaa fullinta hagaajinta baskiilka sida qeyb ka tirsan mashruuca Adeegsiga Mount Baker. 	\$65M
<ul style="list-style-type: none"> Ammaanka Lugeeyaha: Hagaaji ilaa 225 blog oo ah burburka dhinacyada lagu socdo ee ku yaal gudaha xarumaha magaalada hoose iyo xaafadaha 	\$15M
<ul style="list-style-type: none"> Ammaanka Lugeeyaha: Samee hagaajinta taagga dhinaca lagu socdo iyo meelaha laga gudbo ilaa 750 isgoys magaalada oo idil 	\$30M
<p>Mashaariicda Xaafadda</p>	\$26M
<ul style="list-style-type: none"> Mashaariicda Xaafadda: Dhamaystir 20-35 mashaariic muhiim ah oo laga fulliyo xaafadaha si loo horumariyo ammaanka, dhaqaaqa iyo adeegsiga iyo tayada nolosha xaafadahaas 	\$26M
 <p>Dayactirka iyo Hagaajinta Yareey shaqada dayactirka iyo hagaajinta u hartay jidadka halbowleyaasha waaweyn iyo jidadka baabuurta ku badan tahay ee Seattle</p>	\$420M
<p>Jidadka Buurta</p>	\$250M
<ul style="list-style-type: none"> Dayactirka Jidka Halbowlaha: Dib u saar laami ilaa 180 mayl oo ah jidadka halbowlaha, dayactirka iyo casriyeynta 35% jidadka ugu baabuur badan ee Seattle, ee qaada dadka iyo xamuulka ugu badan (sidoo kale laga maalgeliyay 7 jidadka gaadiidka dadweynaha la horumariyay, hoos) 	\$235M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Meelaha u Baahan Laamiga: Dib u saar laami ilaa 65 goobo cayiman sannad kasta, qiyaas ahaan wadarta 70 mayl-leen oo ah jidka halbowlaha, halkaas ay shaqaalaha Magaalada fulliyaan barnaamijka hagaajinta iyo dayactirka 	\$15M

Buundooyinka iyo Dhismooyinka - ilaali ammaanka buundooyinkena	\$140M
<ul style="list-style-type: none"> Dayactirka Buundada iyo Dhismooyinka: Waxay meesha ka saartaa shaqada hartay ee la xariirta hagaajinta meelaha loo baahan yahay buundooyinka 	\$25M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Gariirka Buundada: Xooji 16 buundo si ay ugu adkeystaan gariirka 	\$68M
<ul style="list-style-type: none"> Baddalaadda Buundada: Baddal buundada looxa ugu dambeyso ay baabuurta marto ee Seattles (kuna taal Fairview Avenue) 	\$27M
<ul style="list-style-type: none"> Baddalaadda Buundada: Qorsheyso iyo handaso u samee baddalaadda buundada mudnaanta sare si loo bilaabo dhismaha sannadka 2024 kaddib. Maaliyadda lagu tilmaamay qeybtaan, ilaa \$10 malyan oo ka tirsan wadarta maalgelinta (deegaanka, canshuurta, hantida u aruurtay) waxaa dhici karto in loo isticmaalo fullinta mashaariicda ammaanka lugeeyaha iyo baskiilka ee muddada gaabana iyo saaran buundooyinka lagu sameeyo daraasadda baddalaadda (taasoo dheeraad ku ah maalgelinta mashaariicda amaanka lugeeyaha iyo baskiilka qeybaha kale). 	\$15M
<ul style="list-style-type: none"> Dayactirka Buundada iyo Dhismooyinka: Maalgelinta kale ee ku saabsan ammaanka buundada sida jaranjarada iyo hagaajinta iyo dayactirka dhismaha 	\$5M
Jiqda iyo dareerinta magaalada	\$30M
<ul style="list-style-type: none"> Jaridda Geedaha: Ku dar koox cusub oo ahamiyadda siisa geedaha, degdeg uga jawaabta baahida jaridda lagama maarmaanka ah (sida meelaha dadka ku wadaan baskiilada iyo meelaha ay ku socdaan, iyo meelaha baska joogsado) iyo hubinta in la baneeyo oo si wanaagsan loo arko nalalka baabuurta iyo calaamadaha. Abuurista Geedaha: Baddal geed kasta oo meesha laga gooyo taasoo ugu wacan cudur ama ammaanka kuna baddal labo geed cusub 	\$20M
<ul style="list-style-type: none"> Iskaashiga Dareerinta: Iskaashi la sameey Danabyada Dadweynaha Seattle (Seattle Public Utilities) si laami loo saaro jidadka, la dhiso meelo cusub ay dadka ku socdaan iyo isgoysyada, iyo wax ka qabashada arrimaha dareerinta meelaha u nugul fattahaadda sida xaafadda South Park 	\$10M
 Fududeynta Saxmada <i>Horumari xulashada gaadiidka shabakada oo idil</i>	\$303M
Hagaaji Jidadka Dhaqaaqa - casriyey jidadka	\$169M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaaji gaadiidka hababka badan: Dhamaystir 7 gaadiidka dadweynaha iyo mashaariicda noocyada gaadiidka badan, dib u handasada jidadka waaweyn ay inta badan maraan basas leysku haleyn karo, hagaajinta laamiga, nalalka iyo hagaajin kale si loo hagaajiyo isku xerka iyo ammaanka dhamaan musaafiriinta, haddii ay lugeyaan, wataan baskiil, wadaan baabuur, ama qaataan gaadiidka dadweynaha; dhamaystir isku xerka ka maqan Jidka Burke Gilman, mashaariicda Fauntleroy Way Southwest Boulevard, soo saar handasada iyo dhamaystir hagaajinta si loo horumariyo Jidka NE 45th St loogu talagalay dadka lugeeyo iyo kuwa watto baskiilada inta u dhexeyso 4th Ave NE iyo Brooklyn Ave NE marka la furo Treenka Fudud ee Jaamacadda sannadka 2021, iyo qorsheyso hagaajinta jidka Aurora Ave N. 	\$104M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Isku Aadinta Nalalka Jidadka: Isku toosi nalalka jidadka 5 jid oo ka yaal magaalada sannad kasta si loo hagaajiyo socodka baabuurta iyo si loogu adeego dadka ku jira gudaha baabuurta yaryar iyo gawaarida, kuwa watta baskiilada, gaadiidka dadweynaha, iyo kuwa lugeeya. 	\$13M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Siistemka Gaadiidka Caqliga ku Dhisan: Fulli Hagaajinta Siistemka Gaadiidka Jiilka Xiga ee Caqliga ku Dhisan si dhamaan musaafiriinta loogu kaalmeeyo in ay isku haleyn u maraan magaalada iyo si ay macluumaad wanaagsan u siiyaan musaafiriinta 	\$17M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Jidadka Gaadiidka Dadweynaha: Waxaad adeegga baska ka dhigtaa mid leysku haleyn karo taasoo lagu gaaro barnaamijka hagaajinta dhamaystiran gaadiidka dadweynaha ka shaqeeyo goobaha muhiimka ah oo wax ku biiriya hagaajinta gaadiidka dadweynaha 7 ka mid ah jidadka gaadiidka dadweynaha iyo ka badan kana mid ah qorshaha lagu gaaro iyo hagaajinta tagidda gacanka West Seattle. 	\$35M

Hagaajinta Iskaashiga Treenka Fudud - hagaaji meelaha lagala xariiro treenka fudud	\$27M
<ul style="list-style-type: none"> Isku Xerka Treenka Fudud: Maalgelin lagu tabaruco Magaalada si saldhig cusub loogu dhiso Treenka Fudud ee Graham Street kuna yaal dhanka koofur bari Seattle 	\$10M
<ul style="list-style-type: none"> Buundada Northgate: Bixi maalgelin dheeraad ah oo la siiyo Magaalada si loo dhiso buundo dadka iyo baskiilada maraan oo kor marta I-5 kuna xeranta treenka fudud ee Northgate 	\$15M
<ul style="list-style-type: none"> Isku Xerka Treenka Fudud: Fulli qeybaha hore mashruuca Mt. Baker 	\$2M
Hagaajinta Jidadka Lugeeyaha iyo Baskiilada - fududee socodka iyo baskiilada. Maaliyadda lagu tilmaamay qeybtaan, \$2 malyan waxaa loo dhigi doonaa fullinta hagaajinta meelaha lagu socdo sida qeyb ka tirsan mashruuca Mount Baker.	\$68M
<ul style="list-style-type: none"> Dhinacyada Cusub ee Lagu Socdo: Dhis 150 blogyo cusub oo ah dhinacyada lagu socdo, buuxi 75% godadka dhinacyada lagu socdo kuwa mudnaanta leh ee ku yaal jidadka gaadiidka dadweynaha magaalada oo idil, xoogna la saaro abuurista jidadka ay isticmaali karaan dadka itaalka darran iyo waayeelka Dhismooyinka Baskiilka iyo Socodka: Ilaali ammaanka jidadka aan lahayn dhinacyada lagu socdo kana dhig dhib la'aan socodka, taasoo lala kaashado Danabka Dadweynaha Seattle (Seattle Public Utilities) xaafadda u nugal fattahaadda ee Broadview 	\$61M
<ul style="list-style-type: none"> Dhismooyinka Baskiilka iyo Socodka: Dhis 1,500 meelo cusub oo baabuurta la dhigto magaalada oo idil iyo dayactir dhismooyinka jira ee loogu talagalay baskiilada Dhismooyinka Baskiilka iyo Socodka: Maalgelinta kale ee la xariirta baskiilada iyo socodka 	\$7M
Hagaajinta Gaadiidka Xamuulka - xamuulka iyo geynta	\$39M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Iskaashiga: Qorsheeyso lacagta laga soo aruuriyo deegaanka si loo handaso loona dhiso Jidka Kore Lander Street 	\$20M
<ul style="list-style-type: none"> Shabakada Qaadidda Culus: Dhis jidka East Marginal Way, jid muhiim ah oo ka tirsan Shabakada Xumuulka Culus ee Seattle 	\$5M
<ul style="list-style-type: none"> Hagaajinta Meelo Gaar ah: Maal geli barnaamijka hagaajinta meelaha u baahan si loo kaalmeeyo dhaqaaqa xamuulka. 	\$14M
Wadarta Guud (Dhamaan Qeybaha)	\$930M

In badan ka ogaaw www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle

SU'AALO? La xariir Allison Schwartz allison.schwartz@seattle.gov ama (206) 386-4654